



Wararkii u dameebeyey ee ciyaaraha: Cleveland wuxuu ka guuleysatay Dugsiga Sarre Grant sidii ay heli lahayd ordada gaagaaban ilaa koobka kubada cagta gabdhaha ee iskuulada

Cleveland wuxuu soo gaaray meeshii uu guusha ku hantiyi lahaa ciyaaraha iskuulada Portland ee koobka kubada cagta gabdhaha, kaasi oo guushii ku raacday 2-1 uu kaga guuleystay Dugsiga Sarre ee Grant ciyaartaasi oo la wada ciyaaray maalintii Arbacada, bishan Oktoobar 11keedii, oo ka dhacday Dugsiga Sare ee Cleveland.

Gabadhan Julia Downing oo dhigata fasalka 12naad ayaa ciyaarta qeybteedii dambe waxa ay dhalisay goolkii ugu horeeyey iyada oo ka soo laaday koonaha, ciyaarta qeybteedii hore waxay ku dhammaatay 1-1, taasi oo kooxda Warriors siiyey kaligood inay hantiyaan kaalinta koowaad ee ciyaaraha iskuulada.

“Waxa ay noo ahayd guul aad u weyn,” sidaas waxaa tiri tababaraha Dugsiga Cleveland oo ay ugu horeysay sanadkan inay tababare u noqoto, Emily Ngan. “Waxa aan ka fikireynay sidii aan isku kaashan lahayn koox ahaan 40 daqiiqo ee ugu dambeeyey.”

Lauryn Ruegg oo ah fasalka 12naad ee Dugsiga Sare ee Cleveland ayaa iyana waxay dhalisay gool rigoore ah oo loo dhigay iyada oo u laaday ciyaarta qeybteedii hore taasi waxay siisay inay ciyaarta Cleveland ku hoggaamiyaan 1-0. Dugsiga Sarre ee Grant wuxuu barbareeyey markii ay kubada ka soo laadeen xariiqa 18naad. Goolkaasi Generals wuxuu u sahlay Cleveland inay tartanka kaga guuleystaan 3-1 Liberty bishii Ogoosto 31keed. Kooxda Warriors marnaba hal gool iskuma dhiibin marka aad eegto sagaalkoodii ciyaarood ee kale.

Dugsiga Sarre ee Cleveland, wuxuu tartanadan ka galay kaalinta 5aad ee tartanada OSAA marka la eego awoodooda lagu qiimeynayo heerkooda kaasi oo ay ugu gudbaan ciyaaraha kama dambeysta ah, waxa ay yimaadaan kaalinta 2aad iyaga oo ku guuleystay. Dugsiga Sarre ee Grant wuxuu soo gaaray kaalinta 3aad isaga oo waliba laga badiyey.

Cleveland (9-1-1, 4-0 PIL), markii ugu dambeysay ee ay ku guuleystaan ciyaaraha iskuulada waxay ahayd sanadkii 2015, iyaga oo ku guuleystan sagaal ciyaarood oo isku xigay. Kooxda Warriors waxa u haray labo ciyaarood oo lagu soo dhammeystirayo ciyaarihii xilligan, oo ka dhici doona maalinta Tallaadada Dugsiga Sarre ee Roosevelt iyo ciyaarta kale oo ka dhici doonta Dugsiga Sarre ee Franklin.

Grant (9-1-2, 3-1-1) wuxuu isna soo galay kaalinta labaad isaga oo barbareeyey Dugsiga Sarre ee Wilson (7-4-2, 3-1-1). Labada kooxood Generals iyo Trojans waxa ay isku barbareeyeen 0-0 bishii Sebtember 28keedii.

Ciyaaraha Dhici Doona

Football: Grant wuxuu la ciyaari doonaa Lincoln maalinta Jimcaha, ciyaartaasi oo ah ciyaarta ugu ugu weyn ciyaaraha iskuuladu ay ciyaarayaan. Labada kooxoodba tartanka wax weeyaan 5-0, taasi oo ka dhigi karta inay noqdaan labada kooxood iskugu soo baxay kooxda ciyaarta .

Kubada Koleyga: Lincoln, wuxuu ku dhowyahay inuu ku guuleysta ciyaaraha iskuulada, waxa uu soo dhameeyeen ciyaarihii caadiga ahaa iyada oo ay iskuulkooda ku wada ciyaari doonaa Cleveland maalinta Tallaadada sidoo kalena maalinta Khamiista Jefferson. Kooxda Cardinals (17-0, 14-0) waxa laga guuleystay tartankii ciyaaraha laba ciyaarood, waxaana kamid ahaa ay ka ciyaareen Grant.

Orodadda: Saddex Kooxood oo ka mid ah ciyaaraha iskuuladu ee Benson, Wilson iyo Lincoln waxa ay ku tartami doonaa kooxaha Mt. Hood goobta Fernhill Park. Sidoo kale Dugsiyada Madison, Cleveland iyo Roosevelt iyagu waxa ay tartami doonaa Pier Park. Ugu dambeyntii Franklin, Jefferson iyo Grant waxa ay ku tartami doonaa Lents Park.

Kubada cagta wiilasha: Grant (9-0-2, 3-0-2 PIL) wuxuu kaalinta 1aad kaga jiraa OSAA, laakiin Generals waxay imanayaan kaalinta labaad iyaga oo ka dambeeya Lincoln (7-2-2, 5-0). Ka dib marka Dugsiga Grant la ciyaaro Benson iyo Lincoln-na la ciyaaro Franklin maalinta Tallaadada, Dugsiyada Grant iyo Lincoln ayey ku soo gebogaboobi doonaa ciyaarihii caadiga ahaa maalinta Khamiista oo tartanka kooxaha ugu sareeyaa ka dhici doonaa Dugsiga Sarre ee Lincoln.